
EPA United States Environmental Protection Agency

# Waa maxay Sababta Coco Red?

**Coco iyo asxaabtiisa waxay xaliyaan mushkilado badanoo ay ka ogaadeen tayada hawada.**



Lambarka Daabacaadda EPA-456/K-22-001
Abriil 2022

# Waa maxay Sababta Coco Red?

Coco iyo asxaabtii waxay wax ka ogaadeen qiiqa dabka iyo tayada hawada.


waxaa diyaariyay:
Hay'ada Ilaalinta Deegaanka Maraykanka

Deegaanada EPA 8, 9, iyo 10 iyo
Xafiiska mas'uulka ka ah qorsheynta tayada hawada iyo heerarka.

Kala soco Coco iyo asxaabtii wixii xog ee cusub inta ay wadaan inay xogta ka ogaadaan qiiqa dabka kaynta iyo sida uu u saamayn karo tayada hawada. Buugan waxaa loogu talo geley dhamaan caruurta, gaar ahaan kuwa qaba neefta, iyo daryeelayaashooda.

Coco iyo Kiil waa jirjiroolayaal. Waxay bedelaan midabkooda si ay iskugu eekeysiiyaan deegaanka ku xeeran.

Waxaa loo yaqaan tan **camouflage**.





Coco iyo Kanool waxay jecel yihiin inay banaanka ku ciyaaraan. Hadii hawady nadiif tahay, Coco waa cagaar.




Laakiin Coco waa gaar. Waxa uu bedelaa midabkiisa si uu iskugu eekeysiiyo tayada hawada ku xeeran. Sidoo kale waxa lamid ah walashii, Cece.

“Coco, maxaan iskugu bedelaa huru-ud?”

Coco waxa uu u sheegey, "Waxa aad isku eekeysiinayaa jadwalka tayada hawada! Waxay noo sheegaysaa sida ay hawadu nadiif u tahay ama wasakh u tahay.  Marka tiradu ay ka badan tahay 100, hawadu waxay noqon kartaa mid xun in lagu neefsado.  Waa inayna ka taxadirnaa."



"Yowza," ayay tidhi Cece.






"Waxa aan la socon karaa tayada hawada sidoo kale ana!" ayuu yidhi Kool.



Saaxiibkood KC ayaa iminka ula soo guuray qoyskiisa xee-bta.



Way u xiiseen laakiin mar walba way la sheekeystaan.

Hal maalin, Coco iyo Kool ayaa ku ciyaarayay banaanka Dugsiga Hoose ee Lizard Lick. Kool waxa uu uriyay qiiqa hawada maraya.





Coco ayaa bilaabay inuu isku bedelo
huruud oo Cece waxay noqotay
huruud maadaama oo ay ku jirtay
gudaha dugsiga.



Kadibna Coco ayaa noqday liimi. "Coco, muuqa-
alkaagu ma wanaagsana. Aynu aayar socono," ayuu
yidhi Kool.





Maalintii xigtay, Coco waxa uu noqday casaan.

Fasalka, jirjiroolayaashii kale ayaa noqday dareemi marka ay ku fadhiistaan miiska iyo kursiga. Marka laga tago Coco.

"Muxuu Coco casaan u noqday, Ms. Bugeye?" Kool ayaa waydiiyay macalinkooda.






"Hmm. Runtii, hadii Coco noqday casaan, waxay ka dhigan tahayin tayada hawadu aad u xun tahay sidoo kale. Waxa aan maqlay in danab kusoo dhacay markii uu bilaabmayay **dabka kayntu** ee kaynta oo 100 mayl u jirta halkan," Ms. Bugeye yidhi.

Markii ay guriga ku sii socdaan, Coco waxa uu yidhi, "Kool, laabta ayaa u cuslaatay. Waxaan u malaynayaa in **neefta** igu kacday."



**Neefta** waxaa weeye xanuun keeni kara mushkilad neefsi. Curuur, kuray, iyo dad waawayn oo badan ayaa qaba **neefta**. Marka ay kacdo **neefta** waxaa weeye makra aanu sambabku heleynin hawo ku filan. Waa la qufici karaa ama hiiraagi karaa, ama laabta ayaa ku xanuuni karta ama ku adkaan karta. Qiiqa ayaa kicin kara **neefta**.




Waxay ku ciyaari karaan gudaha, halkaas oo ay ka jirto hawado nadiif ahi.




**Nadiifiyaha hawada** ee guriga ayaa ka caawiya Coco inuu neefsado. “Waxa iminka waan dhaamaa,” ayuu yidhi.




“Laakiin waxa aad weli tahay liimo, markaa hawadu weli nadiif maaha, gudaha guriga xataa!” ayuu yidhi Kool.

“Miyaad u malaynaysaa in KC uu neefsanayo hawada tayada xun sidoo kale?” ayuu yidhi Coco. Waxay kala hadleen fiidyoo kool KC.

KC waxa uu doonayaa inuu wax ka ogaado dhamaan **dababka kaynta**. "Miyaad baqanaysaan?"

"Dabka kayntu wuu fog yahay, markaa waa amaan," ayuu yidhi Coco.





"Laakiin dabaysha ayaa qiiqa ilaa halkan kusoo afuufta ilaa halna, oo hawada ayay wasakhaysaa," ayuu raaciyay Kool.




“Yikes, neefsigaagu ma caadibaa?” ayuu waydiiyay KC.

Coco waxa uu yidhi, “Weli banaanka ayaanu ku ciyaari doonaa, laakiin way adag tahay ama ilaa inta aanu karno.  Gudaha waxa aanu xidhi doonaa daaqadaha iyo albaabada si aanu qiiqu usoo gelin.”

"Waxaa halkan ka jira sidoo kale dab!" KC ayaa u sheegey. "Laakiin maaha **dabka kaynta**. Mararka qaar dab damiyayaasha ayaa bilaaba dab yar oo kaynta ah si ula kac ah. Waxaa loo yaqaan **gubitaanka qorshaysan**. Waxay baneeyaan dhulka meesha ay jiraan geedo iyo jajab geedo oo badan oo dhintay. Waxay ka caawisaa in **dabka kayntu** aanu sii xumaanin."




"Marka aan uriyo qiiq, waxa aan eegaa websaytka AirNow oo aan ka heleyo khariira tusaysa qiiqa xaafadayda," ayuu yidhi KC.




**Gubista Qorshaysan** ayaa sido kale loo yaqaan gubitaanka la qoray ama gubitaanka la xakameeyay. Waxaa lagu xakameeyaa iyada oo dab ay isticmaalaan kooxda dabka khibrada u leh xaaladaha cimilo qaar si ay kayntu u caafimaad qabto.

Maalintii xigtay, Coco iyo Kool waxay kala sheekeysteen Ms. Bug-eye waxay ka ogaadeen **gubista qorshaysan** iyo khariirada qiiqa.



"Maxay uga eegi waayeen websaytka AirNow si ay wax badan uga ogaadaan waxa ka socda halkan?" ayay tidhi.

“Cool,” ayuu yidhi Kool, “waxa aad arki kartaa hadii qiiqa uu ka duwan yahay ka dabka kaynta ee socda. Meel fog ayuu qaban karaa!”




“**Kormeerka hawada** ee nagu xeeran iyo dhamaan dalka oo dhab ayaa cabira sida ay u nadiif tahay ama wasakh tahay hawadu. Waxay tan ka caawisaa saynisyahanada inay wax ka ogaadaan qiiqa **dabka kaynta** iyo tayada hawada.”


Haalin Coco ayaa soo toosay oo waxa uu waayay urtii qiiqa. "Waxa aan noqdan cagaar markale!"






Ciidankii dab damisku waxay ka joojiyeen **dabka kaynta** in aanu faafin, oo labada dabka iyo qiiqii iminka wuu joogsaday.

Coco, Kool iyo KC iminka waxay yaqaanaan halka ay ka heleyaa xogta qiiqa **dabka kaynta**. Oo iminka waxa aanu garanaynaa sia aanu uga ilaalinayno nafteena hawada tayada xun....



Oo Cece waxay doonaysaa inay noqoto ciidanka dab damiska marka ay waynaato! Coco waxa uu doonayaa inuu noqdo shaqaalaha saadaasha hawada.

Wax ka oggow qiiqa **dab damiska** iyo **Shaxda Tayada Hawada** oo booqo www.AirNow.gov.



# Kaydka

**Nadiifiyaha Hawada** – Aalad loo isticmaalo in lagaga saaro wasakhsa, sida qiiqa, hawada.

**Shaxda Tayada Hawada (AQI)** – Ka fikir AQI inay tahay sida barxad la ordayo oo leh 0 ilaa 500. Markasta oo ay badato xadiga AQI, waxaa badan wasakhsa hawada ku jirta. AQI waxay leedahay 6 midab oo lagu karto sida ay hawadu nadiif ama urkag u tahay bulshadaada. Marka aad ogaato midabka AQI ee aagaaga, waxa aad qaadi kartaa talaabooyin aad ku ilaalinayso caafimaadkaaga.

**Kormeeraya Hawada** – Qalab cabira heerka wasakhda hawada ee inagu xeeran. Waxa loo isticmaali karaa gudaha iyo banaanka.

**Neefta** – Xanuun keeni kara mushkilad dhanka neefsiga ah. Curuur, kuray, iyo dad waawayn oo badan ayaa qaba neefta. Marka ay kacdo neefta waxaa weeye makra aanu sambabku heleynin hawo ku filan. Waa la qufici karaa ama hiiraagi karaa, ama laabta ayaa ku xanuuni karta ama ku adkaan karta. Qiiqa ayaa kicin kara neefta.

**Camouflage** – Midabada u sahla xayawaanka inay lamid noqdaan deegaanka ku xeeran.

**Gubista La Qorsheeyay** – Oo sidoo kale loo yaqaan gubista la qoray ama gubista kaxamaynta. Waxaa lagu xakameeyaa iyada oo dab ay isticmaalaan kooxda dabka khibrada u leh xaaladaha cimilo qaar si ay kayntu u caafimaad qabto.

**Kooxda Xasaasiga ah** – Kooxda xasaasiga ah waxay u bahan tahay inay ku yeelato saamayn neefsi marka ay neefta ku kacdo heerka hoose ee wasakhsa hawada, sida marka AQI uu yahay liimi. Kooxaha loo arko inay u nugul yihiin wasakhsa hawada waxaa kamid ah caruurta, dadka qaba neefta, ama wadne xanuunka, iyo dadka kale ee waayeelka ah. Ka eeg liiska dhamaystiran https://www.airnow.gov/publications/activity-guides-publications/.

**Dabka Kaynta** – Waxaa weeye dabka kaynta oo aan qorshaysnayn oo ka dhaxa aag kayn iyo dhir ah.

**Qiiqa Dabka Kaynta** – Waxaa weeye doog iyo waxyaabo budo ah oo ka soo kaca dhirta gudaha, iyo dhismayaasha iyo waxyaabaha kale oo ku keena mushkilad caafimaadka sida qufac, cune canuun, iyo neefta.

# Tixaaca Macalinka iyo Waalidka (Jawaabuhu waxay ku yaalaan dhamaadka)

**1. Cid waa in ayna ku ciyaarin banaanka marka midabka tayada hawadu uu yahay:**
*a) Liimi b) Soosali c) Xanaaq*

**2. Hadii midabka tayada hawadu uu yahay liimi ama casaan, waa in maalinta oo dhan guriga aan laga bixin miyaa?**
*a) Maya, laakiin kolba halaga soo galo b) Haa c) Maya*

**3. Hadii kalmada tayada hawayd ee malaintaasi ay tahay "wanaag," waa maxay midanka tayada hwadu?**
*a) Cagaar b) Liimi c) Soosali*

**4. Midabka tayada hawada ee casaanku ee hawada banaanku waa:**
*a) Qurux b) Casaan c) Uskag*

**5. Neefta ayaa adkaysa in:**
*a) Neefsiga b) Dambiga Danba c) Akhriska*

**6. Run mise Been: mararka qaar danku waa mid la qorsheeyay.**
*a) Run b) Been*

**7. Intaa masaafadee ayuu gaadhaa dabka kayntu?**
*a) Dhawr fuudh b) Kumanaan mayl c) Labada a iyo b*

**8. Hadii aad ku ciyaarayso banaanka oo aad aragto ama uriso qiiqa waa inaad:**
*a) Baaskiil kaxaysataa b) Kusii ciyaartaa banaanka c) Joojisaa oo aad u sheegtaa waalidkaa ama macamliinta*

**9. Miyad arki kartaa uskaga hawada?**
*a) Haa b) Maya c) Mararka qaar, laakiin maaha marwalba*

**10. Maxay ugu adkaysaa caruurta inay neefsadaan hawada uskaga ah?**
*a) Waxa aad u baahan tahay inaad seexato b) Jidhkaaga iyo sanbabkaaga ayaa weli koraya c) Waa inaad cunto buskud badan*

# Macluumaadka

**Macluumaadka Dabka Kaynta**

**U diyaar garawga ama ka jawaabida dabka kaynta -** www.epa.gov/natural-disasters/wildfires
**U diyaar garawga Dabka Kaynta (CDC) -** www.cdc.gov/disasters/wildfires/beforefire.html
**Diyaar u Ahaanshaha Dabka Kaynta (Ready.gov)-** www.ready.gov/wildfires
**Jantuuska Dabka iyo Qiiqa**- fire.airnow.gov/
**Qalabka U Diyaar Ahaanshaha Qiiqa Dabka Kaynta** - www.epa.gov/smoke-ready-toolbox-wildfires
**Abuurista Qol Nadiif ah La Ilaaliyay Tayada Hawadiisa gudaha Wakhtiga Dabka Kaynta -**
www.epa.gov/indoor-air-quality-iaq/create-clean-room-protect-indoor-air-quality-during-wildfire

**Macluumaadka Tayada Hawada**

**Waa maxay midabka hawadaadu maanta?** - www.airnow.gov
**Boga AIRNow ee Ardayda -** https://www.airnow.gov/education/students
**Fidyawyada Tayada Hawada AirNow -** https://www.airnow.gov/air-quality-videos/
**Abuurista Tayada Hawada Gudaha oo Caafimaad Qabta Gudiga** - https://www.epa.gov/iaq-schools.
**Qaybta Caafimaadka Gaarka ah ee Deegaanka ee Caruurta (PEHSU)**
PEHSU waxaa loo abuuray si ay u xaqiijiso in caruurta iyo bulshadu ay u qiimeeyaan, caadiyan si bilaash ah, aqoonta caafimaad ee gaarka ah iyo macluumaadka caruurta ee wajahaysa khatarta caafimaad ee ka yimaada waxyeelada deeganaka ee dabiiciga ah ama bilaa aadanku sameeyay. Booqo www.pehsu.net.

**Barnaamijka Gidniinta Tayada Hawada**

Barnaamijka Digniinta Tayada Hawadu waxa uu ka caawiyaa caruurta, waalidka, iyo bulshada kale inay la socdaan xaaladaha tayada hawada iyada oo la isticmaalayo digniinta midanka ah. Maalin walba, digniinta ee calaamdaaha heerka tayada hawada ee maalintaas ayaa kor loo qaadaa ee hay'adaha ka qayb gala. Marka la eego birta digniinta iyo qaybaha digniinta midabka ah ee Jaantuska Tayada Hawada (AQI), xubnaha bulshada ayaa garan kara tayada hawada maalin walba waxay tahay oo hawlaha ay qabayaan u habaysanaya si ay u yareeyeen inay soo gaadho wasakhda hawadu.
www.airnow.gov/flag.

## Macluumaadka Neefta

**Macluumaadka Waalidka - Waxa uu Ka Caawiyaa Ilmaha Inuu Yareeyo Inay Ku Kacdo Neefta:**

- Waxa uu kala shaqeeyaa dhakhtarka ilmahaaga si loo ogaado waxa ku kiciya neefta ilmahaaga.
- Talaabooyinka la qaadayo si loo yareeyo in ilmaha uu soo gaadho waxa ku kiciya neefta.
- Kala shaqee dhakhtarka ilmahaaga inuu keeno qorshe hawleed qoran oo lagu yaraynayo neefta ilmahaaga.
- Raac qorshe hawleedka neefta. Waxa aad ku haysataa meel dhaw dawada la nuuno... guriga, dugsiga, meel walba.
- La wadaag nuqulada qorshe hawleedka neefta ee ilmahaaga dugsiga, macalimiinta, shaqaalaha haya iyo xubnaha qoyska ee ilmahaaga.
- Kala sheekeyso qorshe hawleedka neefta ilmahaaga dadka kamid ah nolosha ilmahaaga si markaa, hadii ay ku kacdo neeftu, ay u gartaan waxa la samaynayo.
- Waxa aad la socotaa inta jeer ee ay neeftu ku kacdo sida qufac, laabta oo adkaata, hiiraag iyo mushkilad neefsi. Ka dalbo warbixinaha astaamaha neefta ee dugsiga ama daryeelka ilmaha.
- Xasuusi ilmahaaga inuu farxasho oo uu yareeyo faafitaanka durayga.
- La xidhiidh dhakhtarka ilmahaaga hadii ilmahaagu uu qabo astaamaha neefta ama isticmaalka kaar jabiyaha la neefsado wax ka badan hal ama laba jeer todobaadkii. Adiga iyo dhakhtarka ilmahaaga ayaa habayn kara qorshe hawleedka neefta.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan neefta ilmahaaha, booqo www.epa.gov/asthma ama www.noattacks.org.

**Macluumaadka Neefta ee Dugsiyada: -** www.epa.gov/iaq-schools/managing-asthma-school-environment ama www.nhlbi.nih.gov/health-topics/publications-and-resources

# Tixaaca Macalinka iyo Waalidka (Jawaabaha)

**1. Cid waa in ayna ku ciyaarin banaanka marka midabka tayada hawadu uu yahay:**

*b) Soosali*

**2. Hadii midabka tayada hawadu uu yahay liimi, casaan ama kasii daran, waa in maalinta oo dhan guriga aan laga bixin miyaa?**

*a) Maya, laakiin kolba halaga soo galo. Jimicsigu wuu wanaagsan yahay, laakiin yaree marka ay hawadu wasakh tahay. Marka kasta oo aad mudo dheer banaanka ku ciyaarto, waxa aad u baahanaysaa nasashooyin badan, oo ciyaar ciyaaro aan u baahnayn or orod badan.*

**3. Hadii kalmada tayada hawayd ee malaintaasi ay tahay "wanaag," waa maxay midanka tayada hwadu?**

*a) Cagaar*

**4. Midabka tayada hawada ee casaanku ee hawada banaanku waa:**

*c) Uskag/Wasaqda*

**5. Neefta ayaa adkaysa in la:**

*a) Neefsado*

**6. Run mise Been: mararka qaar danku waa mid la qorsheeyay?**

*a) Run*

**7. Intaa masaafadee ayuu gaadhaa dabka kayntu?**

*c) a iyo b labadaba*

**8. Hadii aad ku ciyaarayso banaanka oo aad aragto ama uriso qiiqa waa inaad:**

*c) Jooji oo u sheeg waalidiintaada ama macalimiintaada*

**9. Miyad arki kartaa uskaga hawada?**


*c) Mararka qaar, laakiin maaha marwalba. Hawada ayaa ahaan karta uskag iyada oo xataa u muuqata nadiif. Tusaale ahaan, waxa aad arki karaan oosoonka.*

**10. Maxay ugu adkaysaa caruurta inay neefsadaan hawada uskaga ah?**

*b) Jidhkaaga iyo sababkaagu weli way korayaan*







Maraykanka
Hay'ada Ilaalinta Deegaanka

Lambarka Haabinta EPA-456/K-22-001
Abriil 2022